

XAALLADDA DEGDEGGA AH DIGNIINTA MOBAYLKA AH



Haddii noloshaadu, caafimaadkaaga ama hantidaada ay khatar ku jirto, Digniinta Mobaylka ee Xaalladda Degdegga ah ayaa loo soo diri karaa Mobaylkaaga, ayadoon loo baahnayn inaad isudiwaangeliso ama soo-degsato app.

Ka eeg civildefence.govt.nz si aad u hubiso haddii telefoonkaagu uu ku haboon yahay.



Haddii noloshaadu, caafimaadkaaga ama hantidaada ay khatar aad u daran ku jirto, Digniinta Mobaylka ee Xaalladda Degdegga ah ayaa loo soo diri karaa taleefankaaga Mobaylka ah.

Digniinaha waxaa lasoo diraa ayadoo la isticmaalayo farsamada baahinta xogta, sidaas darteed ma jirto baahi loo qabo in laisu diiwaan geliya ama lasoo degsado app. Waxa kale oo lagu beegsan karaa deegaanka la saameeyey, sidaas darteed waxaad xogtaas heli doontaa kaliya haddii ay xaalladda deg-deg ah ka jirto degaankaaga.

Fariimaha Digniinta Mobaylka ee Xaalladda Degdegga ah waxaa kaliya oo soo diri kara Wasaaradda Difaaca & Maaraynta Xaalladda Degdegga, Kooxaha Maaraynta Xaalladda Degdegga ah ee Difaaca Rayidka, Booliiska NZ, Dabka iyo Xaalladda Degdegga ah ee New Zealand, Wasaaradda Caafimaadka iyo Wasaaradda Warshadaha Aasaasiga ah.

Haddii taleefankaagu uu daaran yahay, awoodana inuu helo xogtaas uuna ku jiro gudaha degaanka la beegsanaayo, waa inaad heshaa digniinahaas. Waxaad ka ogaan kartaa in telefoonkaagu uu heli karo digniinaha civildefence.govt.nz.

Fariimaha Digniinta Mobaylka ee Xaalladda Degdegga ah ma beddelaan digniinaha kale ee Xaalladda degdegga ah. Waxay dheeraad ku yihiin dariiqo kale oo laguugu digayo, oo ay la socdaan janalo kale. Qaado talaabo degdeg ah. Dhammaan telefoonada oo dhan ma awoodaan inay helaan digniinaha, sidaas darteed haddii aad hesho digniin, dadka kale u sheeg. Haddii aad dareensan tahay in noloshaada ay halis ku jirto, ha sugin digniin rasmi ah.

Sidee u shaqeysaa Digniinta Mobaylka ee Xaalladda Degdegga ah?

Digniinaha Mobaylka ee Xaalladda Degdegga ah waxay isticmaalaan signallo gaar ah, si ay u noqdaan kuwo lagu kalsoonaan karo markay jiraan xaallad degdeg ah markaas oo telefoonada mobaylka ah iyo socodka internetka ay xanibaan shabakada.

Muhiim maaha shabakadda aad ku jirtid. Telefoon kasta oo karti u leh inuu galo degaanka inta lagu jiro mudada baahinta xogta wuxuu heli doonaa digniintaas.

Ma iska-joojin karaa helidda Digniinaha Mobaylka ee Xaalladda Degdegga ah?

Maaddaama Digniinaha Mobaylka ee Xaalladda Degdegga ah ay ku saabsan tahay inay kaa dhigto ammaan, ma awoodi doontid inaad joojiso helitaanka Digniinaha Mobaylka ee Xaalladda Degdegga ah. Telefoonkaaga ayaa laga yaabaa inuu muujiyo samaynta khayaarada e laga isticmaalo dalalka kale, hase ahaatee halkan New Zealand waxaanu isticmaali doonnaa janalka baahinta oo gaar ah kaas oo si joogto ah u daaran.

Maxaan tahay inaan sameeyo haddii aan helo Digniinta Mobaylka ee Xaalladda Degdegga ah?

Jooji waxaad samaynayso oo raac tilmaamaha.

Fariimaha Digniinaha Mobaylka ee Xaalladda Degdegga ah waxaa kaliya oo soo diraa waa haya'daha xaalladaha deg-degga ah oo idman, waxa kaliya la soo diraa haddii ay jirto wax khatar daran ku ah nolosha, caafimaadka ama hantida (iyo hal ama laba tijaabo sanadkiiba), markaas haddii aad hesho digniin u qaado si culus oo samee waxa ay leedahay.

Digniinta Mobaylka ee Xaalladda Degdegga ah ma baddesho janalada kale

Digniinaha Mobaylka ee Xaalladda Degdegga ah waa jannal ama dariiqo kale oo loo isticmaalo in laguugu badbaadiyo haddii ay jirto xaallad degdeg ah. Jannalada kale, sida raadiyaha, telefishanka, websitoyada iyo warbaahinta bulshada ayaa weli lasii isticmaali doonaa. Digniinaha ma beddeli karaan nidaamyada kale ee digniinta, ama baahida loo qabo in talaabo laga qaado kadib digniinaha dabiiciga ah.

Weli waa inaad diyaar u noqotaa xaallad deg-deg ah, waana inaad sugin si aad u hesho digniin kahor inta aadan talaaba qaadin. Haddii aad dareensan tahay in noloshaada ay halis ku jirto, ha sugin digniin rasmi ah. Qaad tallaabo degdeg ah.

Waqtii u qaado si aad u sameysid qorshahaaga deg-deg ah oo kuu gaar ah oo ay ku jiraan waxaad sameyn karto, meesha aad aadi kartid, yaa ku caawin kara adiga iyo kuwa u baahan kara caawimaadda. Waxaad ka samayn kartaa qorshe online ah happens.nz.

Faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan Digniinta Mobaylka ee Xaalladda Degdegga ah civildefence.govt.nz.